



# WAXYAALLAHA ISBITAALKA LALA IMANAYO

the women's  
the royal women's hospital  
victoria australia

Liiskan waxaa loogu talagalay dumarka ku dhallaya isbitaalka The Women's.

## Foosha

- dhar debeansan sida shaati duq ah oo, diiran sharaabaad, kaba duug ah (dhowr dersi - oo laga yaabo in aad u baahato kuwaas jeer marka ay biyuhu dilaacaan)
- Barkintiisa oo (la calaamadiyo) haddii la go'aansado.
- Jelka boorsada kulaylka
- Saliid, taalko ama lawshanka la isku duugo
- Isbaray dhalo (aan-lahayn-ayrasool ) ka buufinta qaboojinta biyaha
- Wixii loo adeegsado musqusha - saabuun, Shaambo, daawada cadayga, caday iyo wixii la mid ah.
- Cunooyinka yaryar: Qamadi, Sonkor, jelli, digir, furut, baris iyo wixii la mid ah.
- Dacas ama kuwa horay loo gashado, oo aan lagu siiban iskaalso
- Kaamiro
- Telefoon kan telefoonka lagu buuxiyo
- Saliidaada waxtarka ah ee aad ka hesho (saaliida kaahisa ayaa la helli karaa)
- Muyuusigaaga aad ka hesho oo MP3 lagu daaro ama telefoon (waxaanu haynaa makarafoonoo ayaa la helli karaa)

## Shakhsi ama shakhsiyad u kaalmeeya

- isnaakiska ay ka hellaan oo ay jiraan cabitaan, khaas ah shaah, cabitaanada xafladaha, haddii la rabo.

## Hooyada iyo ilmaha

- Dhar debeansan, kabo, dacas ama sharaabaadka aan lagu siiban (kabaha WAAJIB waxa ah in la gashado mar walba).
- Dharka lagu seexo: dharka hurdada ama dharka habeenimo halkii aad ka qaadan lahayd bijaamo iyo dharka hurdada
- raaja beetada naasnuujinta ama raajabeetada aan birta lahayn (sida kuwa loo isticmaalo jimicsiga) iyo naasnuujinta/suufka caanaha lagu joojiyo
- kan hoosta laga qaato: kor gaaraya, buuxinaya (halkii laga qaadan lahaa bikiini) iyo kuwa badan oo ka mid ah!
- Suufafka dhalida (3 baakadood)

- Cudbiyada kubbada ah iyo kan dharka lagu dhaqo oo la iska tuuri karo ee naabiyada ilmaha (maaha kan laga ganacsado oo ilmah a lagu tirtiro). Talo intaas ka badan arag xaashida xaqiiqada *daryeellaha maqaarka ilmaha*.
- Marada lagu duubayo – si loogu qubeeyo ilmaha looguna qaado ilmaha guriga
- Naabiga ilmaha dhashay (baakit dhan 32)
- dharka ilmaha: funaanado iyo gacma dheerayaal ayaa ugu fiican
- haddii aad qorshaysay inaad isticmaasho caanaha aan xoollaa ka iman si aad u quudiso ilmaha, fadlan keen caanaha foormalada ah ee aad rabto, iyada oo ku jirta daasad ama bac.
- Gaariga ilmaha lagu (xirayo maalinta la saarayo)
- Bustaha ilmaha/shaal guriga lala aadayo.
- Fadlan dahabka, kaararka deynta iyo wixii kale oo qiima leh guriga uga imaw.

Ha keenin lacag cadaana oo tira badan.

## Saacadaha booqashada

Wagtiga booqashadu waa inta dhexaysa 2.30duhurkii iyo 8.00fiidkii. Ninka gabadha qabaa wuxuu booqan karaan inta u dhexaysa 8.00subaxii iyo 8.30fiidkii.

## Joogistaada

Wax yar ka dib marka ilmahaagu dhasho waxaa lagu bedeli doona qaybta dhalida ka dib si halkaas lagula socdo oo lagugu daryeello. Umulisadaadu waxay kaala hadli doontaa qorshahaaga ka bixitaanka. haddii dhalidaadu aanay lahayn wax dhibaato ah adiga iyo ilmuhuna aad fiican tihiin, waad baxaysaan 24saac gudahood. Haddii qorshuhu yahay inaad ku baxdo 24saac gudahood ninkaaga ayaa habeen kula joogi doona wuxuuna baran doonaa sida loo daryeello ilmahaaga.

Haddii qaliin lagugu sameeyey dhalitaankii wax walbaana wanaagsan yihiin adiga iyo ilmaha, joogistaada isbitaalka waxay noqonaysaa 72 saacadood dhalida ka dib. Dumarka ay adkayd dhalistoodu ama carruurto aanay fiicnayn intaas ka badan ayay joogi doonaan.

## Isbitaalka waxaa laga baxayaa 9:30 barka subaxii.

Fadlan qabanqaabi sidii lagu qaadi lahaa waqtigaas.

Xasuuso haddii aad aadayso guriga u raacayso gaarigaaga, waxaad u baahan doontaa in gaariga lagu xiro kursiga ilmaha loogu talagalay oo lagu xiray kan ilmaha haya ka hor intaan ilmahaagu dhalan. (Booqo VicRoads websaytkeeda oo ah [www.vicroads.vic.gov.au](http://www.vicroads.vic.gov.au) ama weydii umulisadaada qoraalka la xiriira ilma ku xirida ee VicRoads).

### **Macluumaad intaas ka badan.**

Booqo qaybta bukaanka iyo kuwa booqashada ku yimid ee websaytkayaga.

[www.thewomens.org.au/PatientsandVisitors](http://www.thewomens.org.au/PatientsandVisitors)

### **Qoraallada xiriirka la leh**

Daryeelka maqaarka ilmaha